

Gunaanadka Qorshaha Kala guurka ah

Xafiiska Gaadiidka ee Portland (Portland Bureau of Transportation PBOT) waxa ay bixinaysaa Cinwaankeeda II Qabyada ah ee ADA Xuquuqda Dad waynaha Qorshaha Qaabka Kala guurka ah wixii ah dib u eegida dad waynaha ilaa Noofambar 20, 2020.

PBOT waxaa ka go`an hanaan gaadiid oo ay heli karaan dhammaan dadka isticmaala. Marka aanu maalgelino kaabayaasha gaadiidka, waxaanu arinkaa u samaynaa qaab taageeraya helitaanka badan wanaagsana ee ay bulshada midabka ah, bulshada dakhligoodu hooseeyo, iyo dadka naafada ah ay ku helayaan.

Dadka dib u eegista ku samaynaya kana faaloonaya qorshaha waxay lama huraan u tahay in ay xaqiijiyaan in uu buuxinayo baahiyahooda. Waa kaliya rayigaas, in qaabka ugu danbeeya ee qorshahaas ay PBOT u qaaddo Golaha Deegaanka Magaalada horaanta 2021 wuxuuna ka tarjumi doonaa baahiyaha dadka deegaanka Portland.

Fadlan bookho websaytka yaga si aad u akhrisato una qaadato sahanka yaga.

[Websaytka Qorshaha Kala guurka ah](#)

[Xog ururinta Qorshaha Kala guurka ah](#)

Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah (Americans with Disabilities Act (ADA) Title II waxa uu uga baahan yahay dowlad goboleed ama dowlad deegaan ee kasta oo leh shaqaale gaaraya 50 ama ka badan in ay yeelato qorshe kala guur ah.

Qorshaha kala guurka ah waa in ay kujiraan waxyaabahaan.

- Caddaynta dhammaan caqabadaha howlaha PBOT iyo waddooyinka dhexdooda iyo kaabada wada dhinaceeda
- Caddaynta miisaaniyadda iyo jadwalka
- Bixinta hanaan cabasho
- Caddaynta qofka mas`uulka ka ah hirgalinta qorshaha
- Bixinta helitaanka wax kasta oo ay hay`addu samayso

Waddooyinka ama dhinacyada jidka, PBOT waxa ay mas`uul ka tahay kaabada wada dhinaceeda, calaamadaha dadka lugaynaya waddada, dhinacyada jidka, gobaha baabuurta la dhigto, iyo joogsiyada gaadiidka ee Aerial Tram iyo Streetcar. Joogsiyada gaadiidka ee basaska iyo waddada tareenka fudud waxaa iska leh TriMet laakiin marka waddada la yiraahdo ama dhinacyada jidka dadku maro waxaa iska leh dowladda hoose. PBOT waxa ay la shaqayn doontaa TriMet si ay u xaqiijiso in joogsiyadaas gaadiidku yihiin kuwo cabasho ah.

Mashaariicda PBOT waxa ay noqon doonaan in dhinacyada jidka dadku maro oo marin muhiima ah, kaabada wada dhinaceeda, calaamadaha goynta waddada ee dadka, meelaha baabuurta la dhigto, iyo joogsiyada gaadiidka la dhigo kuwo ay heli karaan dhammaan isticmaaleyaashu. Mararka qaar, horumariyeyaasha iyo shirkadaha adeeggu waxa ay sidoo kale meesha ka saari karaan caqabadaha si ay magaalada uga dhigaan mid badanaa la gaari karo. Barnaamijyada PBOT sida Safa Routes to School iyo Shared Streets ayaa sidoo kale caqabadaha meesha ka saaraya.

Barnaamijka Ramps by Request waxa uu dadka degen Portland siinayaa awoodda ay kusoo gudbin karaan goobaha halkaas oo ku darista kaabada wada dhinaceeda waddada ay ka caawin karaan abuuritaanka marino ay ayaga ama xubnaha qoysaskooda naafada ah ay u helaan dariskooda.

Waxaa jira lambar teleefoon oo la siiyay, 503-823-SAFE (7233) si ay usoo wargaliyaan jidka wadada dhinaceedaa iyo goobaha jidadka ee aan amaanka ahayn. Sidoo kale waxaa jira hanaan cabasho oo rasmi ah iyo mid gaar ah.

Kani waa qorshe 20 sano jiray kaasoo wax laga badalo 5tii sano ee kasta. Waxaa jiri doona warbixin sanadle ah oo ku saabsan horumarka la sameeyay. Waxaa jira miisaaniyad loogu tala galay dhisidda kaabada wada dhinaceeda kuna socota 2032 taasoo la xiriirta heshiiska gaarka ah. Miisaaniyadaha PBOT, oo ay ka shaqeeyaan shaqaalaha dayactirka PBOT, ay ka shaqeeyaan shirkaduhu, iyo dhismayaasha ay sameeyaan horumariyeyaashu waxa ay had iyo jeer ku darayaan samaynta kaabada wada dhinaceeda, jardiinada waddooyinka, calaamadaha goynta waddada ee dadka, meelaha baabuurta la dhigto, iyo dacwadaha joogsiyada gaadiidka.

PBOT waxa ay bixinaysaa dhowr goobood oo onleen guryo furan ah halkaasoo dadku ay ku baran karaan waxyaabo badan oo ku saabsan qorshaha kala guurka ah. PBOT waxa ay la xiriirtay in ka badan 150 urur si ay uga codsato dib u eegistooda iyo faaladooda ku saabsan qorshaha.

Kaddib marka ay muddada faalada dadweynaha ay dhammaato 20ka Noofambar, 2020, PBOT waxa ay wax ka badali doonaan qorshaha qabyada ah waxa ayna u gudbin doontaa Golaha Deegaanka si ay u dhaqangaliyaan horaanta 2021.

Su`aalaha ama faalooyinka waxaa iimayl ahaan loogu diri karaa ADATransitionPlan@portlandoregon.gov